



Ugu badnaan sideed qof ayaa kulmi kara (Covid-19)

Faafitaanka Covid-19 ee Värmland dartiis, waa mamnuuc in la yeesho isu imaatin dadweyne iyo munaasabado dadweyne in kabadan sideed qof sida waafaqsan Sharciga Nidaamka Dadweynaha.

Maamulka booliska ayaa hubinaya kana warqabaya u hogaansanaanta sharciga iyo nidaamka amarka dadweynaha.

Kulamada dhaqamada diimeed ee la xiriira aaska, ugu badnaan 20 qof ayaa ka qayb gali kara.

Dhamaanteen waxaan u baahannahay inaan qaadno masuuliyadeena shakhsiyeed si aan u yareyno faafidda cudurka, taas oo macnaheedu yahay inaan baajinno, dibna u dhigno kulamada oo keliya aan la kulanno kuwa aan la noolnahay

Su'aalo ma qabtaa?

Wac: 08-123 680 00, Halkaas waxay su'aalaha kaagaga jawaabayaan luuqadahan hoos ku qoran:

engelska - arabiska - somaliska - persiska - dari - tigrinja - amarinja - ryska - bosniska - kroatiska - serbiska - spanska.

Khadka telefonka wuxuu furan yahay maalmaha caadiga ah 09:00-15:00.

Hadii aad wacdid xilli uusan khadka telefonka furneyn waxaad reebi kartaa farriin kadib ayagaa sida ugu dhaqsiiyaha badan ee ay u karaan kuula soo xiriiraya.

